**Tixraac: XRW/ 394 /02/2025** **Taariikh: 26/02/2025**

Ku: Dhammaan Wasiirrada iyo Hay'adaha Dowladda — Muqdisho
Og: Labada Aqal ee Barlamaanka JFS — Muqdisho
Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya — Muqdisho

**UJEEDDO: HIRGALINTA QORSHE HOWLEEDKA GUUD EE FULINTA SIYAASADDA JAANGOYNTA DARAJOOYINKA IYO MUSHAHARAADKA SHAQAALAHA RAYIDKA AH (JOOGTO IYO KUMEELGAARBA).**

RA'IISUL WASAARAHA ★ 26 FEB 2025 ★ EXIT OFFICE OF THE PRIME MINISTER

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 97aad faqradaha (1) iyo (2); Qodobka 99aad faqradaha (a), (b), (e), (f) iyo (i); iyo Qodobka 100 aad faqradaha (a) iyo (d) ee Dastuurka 2012 ee JFS;

**Markuu arkay:** Qodobbada 115–119aad ee Dastuurka 2012 ee JFS;

**Markuu arkay:** Go'aanka Golaha Wasiirrrada ee uu ku ansixiyay "Siyaasadda Jaangoynta Darajooyinka iyo Mushaharaadka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda" (**SHGW.00.13.12.22 ee 01/12/2022)**;

**Markuu arkay:** Xeer Ra'iisul Wasaare Lr. 132 ee ku taarikhaysan 11-05-2023, kuna saabsan "Qaraarka Arrimaha la Xiriira Shaqo Qorista, isku Beddelka iyo Dib-u-habeynta Shaqaalaha Rayidka";

**Markuu arkay:** Warqadda summaddeedu tahay **MOLSA/OM/058/25,** ku taariikheysan **26/02/2025,** kuna saabsan soogudbinta "Qorshe Howleedka Guud ee Fulinta Siyaasadda Jaangoynta Darajooyinka iyo Mushaharaadka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda" ee Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada";

**Markuu tixgaliyay:** Baahida loo qabo dardargalinta iyo hirgalinta hannaanka dib-u-habeynta shaqaalaha rayidka ah ee Dowladda.

**Markuu tixgaliyay:** Soojeedinnadii hore loola wadaagay Golaha Wasiirrada iyo aragtiyihiin xubnaha Golahu ka dhiibteen;

**Waxaa uu go'aamiyay:**

### Qodobka 1aad
### Qorshe Howleedka Guud

Ra'iisul Wasaaraha waxaa uu go'aamiyay Qorshe Howleedka Guud ee **Fulinta Siyaasadda Jaangoynta Darajooyinka iyo Mushaharaadka Shaqaalaha Rayidka ah** ee Dowladda (**Joogto iyo kumeelgaarba**) ee halkan ku lifaaqan, waana qayb ka mid ah Go'aankan.

### Qodobka 2aad
### Hirgalinta iyo Faahfaahinta Qorshaha

Waxaa Qorshahan faahfaahin iyo muddeyn ku sameyn kara Guddiga Jaangoynta Darajooyinka iyo Mushaharaadka oo u xilsaaran hirgalinta Qorshahan.

### Qodobka 3aad
### U-hoggaansanaanta Qorshaha

Waxaa dhammaan Wasaaradaha Dowladda iyo Hay'adaha Dowladda la farayaa in ay u hoggaansamaan dhaqangalinta Qorshahan iyaga oo fududeynaya, fulinayana dhammaan tilmaamaha Qorshahani xambaarsan yahay ee khuseeya Hay'addooda.

### Qodobka 4aad
### La-socodka iyo Fududeynta Hirgalinta Qorshaha

1. Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada waa in ay fududeysaa howlaha ku xiran, la socotaa hirgalinta Qorshahan, lana wadaagtaa Ra'iisul Wasaaraha iyo Golaha Wasiirrada warbixin, hadba marxaladda la marayo.
2. Wasaaradda Maaliyadda waa in ay fududeysaa howlaha ku xiran hirgalintooda si looga miradhaliyio Qorshahan.

### Qodobka 5aad
### Dhaqangalka

Go'aankan waxaa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

## LIFAAQA:

## QORHSE HAWLEEDKA GUUD EE FULINTA SIYAASADDA JAANGOYNTA DARAJOOYINKA IYO MUSHAHARAADKA SHAQAALAHA RAYIDKA AH EE DAWLADDA (JOOGTO IYO KUMEELGAARBA)

| Qeybaha | Halwaha la qabanayo (Major Activities) | Waqiga (Timeframe) | Meesha waxmarayaan (Status) |
|---|---|---|---|
| **Wajiga 1aad: Marxaladda Diyaarowga hirgelinta siyaasadda** | 1. Ansixinta siyaasadda jaangoynta, darajooyinka iyo mushaaraadka ee Golaha Wasiiradda XFS. | Dec. 2022 – Nov. 2024 | Qabsoomay |
| | 2. Ra'iisalwasaaruhu wuxuu ku soo saaray wareegto (Tixraac. no. 132) oo ku saabsan joojinta shaqo qorista shaqaalaha ku meelgaarka ah iyada oo lagu saleynayo Go'aanka Golaha Wasiirada XFS. | | |
| | 3. Magacaabista Guddiga hirgelinta siyaasadda jaangoynta darajooyinka iyo mushaaraadka shaqaalaha rayidka dawladda. | | |
| | 4. Tirakoobka iyo Dliwaangelinta xogta shaqaalaha aan joogtada ahayn. | | |
| | 5. Dib u habeynta iyo diiwaangelinta xogta danabaysan ee dhammaan shaqaalaha aan joogtada ahayn si loo sugo in dhammaan xogta shaqaale kasta looga baahan yahay ay ku jirto galkiisa. | | |
| | 6. U sameynta iyo qeybinta kaararka aqoonsiga ee dhammaan shaqaalaha aan joogtada ahayn. | | |
| | 7. Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee dawladda in uu ku diiwaangeliyo dhammaan xogta shaqaalaha ku meelgaarka xogkeydiyaha danabaysan ee maamulka maaliyadda (SFMIS) si ay qeyb ugu noqdaan hannaanka mushaar bixinta tooska ah. | | |
| | 8. Magaacaabista Guddihoosaadyada Wasaaradda/Hay'adaha dawladda si ay uga qeybqaataan hirgelinta siyaasadda jaangoynta darajooyinka | | |

| | | | |
|---|---|---|---|
| | iyo mushaaraadka shaqaalaha ku melgaarka ah. | | |
| | 9. Guddiga hirgalinta siyaasadda darajooyinka iyo mushaarka shaqaalaha rayidka dawladda oo booqasho aqoon korarsi ah ku tagay Rwanda si ay wax uga bartaaan. | | |
| | 10. Guddiga hirgalinta siyaasadda darajooyinka iyo mushaarka shaqaalaha rayidka dawladda waxay sameeyeen qorhse hawleed dhammeystiran oo qeexaya hannaanka hirgelinta siyaasadda jaangoynta, darajooyinka iyo mushaaraadka shaqaalaha dawladda. | | |
| **Wajiga 2aad: Marxaladda hirgelinta siyaasadda** | 11. In dib u eegis lagu sameeyo dhammaan shaqaalaha aan joogtada ahayn si loo ogaado ku habboonaantooda shaqada iyo in loo beddalo shaqaale dawladeed oo rasmi ah iyada oo lagu salaynayo dakhliga gudaha iyo baahida shaqada. | TBD | Hawl socota |
| | 12. Diyaarinta hannaan qorshe lagu maaraynayo isbeddelka iyo xilligiga kala guurka. | March 2025 | Hawl socota |
| | 13. Golaha Wasiirrada waxay ansixiyeen Xeernidaamiyaha Sharciga Nidaamka Xukuumadda. | Feb. 2025 | Qabsoomay |
| | 14. Ra'iisul Wasaaraha XFS ayaa soo saarayo wareegto (Ref. no. 174) lagu dhaqangeliyo Xeernidaamiyaha Sharciga Nidaamka Xukuumadda oo ay ansixiyen Golaha Wasiirrada XFS. | February 2025 | Qabsoomay |
| | 15. Qabashada xafladda daahfurka iyo wadatashiga hay'adaha dawladda si loogu wargeliyo hirgelinta siyaasadda darajooyinka iyo mushaarka shaqaalaha rayidka dawladda. | Feb. 2025 – June, 2025 | Wali billaaban |
| | 16. Qabashada tababbarda iyo awoodsiinta guddi hoosaadyada hay'adaha dawladda si ay uga qeybqaataan falanqeynta shaqooyinka jira, dib u eegista shaqo qeexeyaasha jiray iyo sameynta shaqo qeexeyaasha cusub. | | |
| | 17. In dib u eegis lagu sameeyo 38 hay'adood ee casriyeynta iyo dib u habeynta lagu sameeyey xilka iyo | | |

| | | | |
|---|---|---|---|
| | waajibaadkooda shaqo si loola jaanqaado isbeddallada shaqo iyo kuwa qaanuuneed ee dhacay xilligii qiimeyntii hore ka dib, iyo in qiimeyn lagu sameeyo hay'adaha dhimman ee dawladda. | | |
| | 18. U sameynta siyaasad iyo xeernidaamiyeyaal lagu maamulo shaqaalaha ku meelgaarka xilliga kala guurka si looga baaqsado in lagu xadgudbo shaqaalaha. | | |
| | 19. Marka la dhammeystiro qiimeynta hay'adaha dawladda, hay'ad kasta waxay yeelanaysaa qaabdhismeed rasmi oo ay ku qeexan yihiin dhammaan jagooyinka hay'ad kasta oo dawladeed. | | |
| | 20. Dhammaan shaqaalaha ku meelgaarka waxaa lagu sameynayaa qiimeyn iyo dib u eegis iyada oo la eegayo ku habboonaantooda shaqada dawladda si loogu meeleeyo hay'adaha cusub ee dawladda. | | |
| | 21. Sameynta falanqeyn dhammeystiran oo ku saabsan qeexidda iyo jaangoynta jagooyinka adeegga rayidka, sameynta shaqo qeexayaal rasmi ah oo ay yeeshaan dhammaan shaqaalaha dawladda | Jan. - Nov. 2026 | Wali billaaban |
| | 22. Qiimeynta dhammaan shaqo qeexeyaasha iyo siinta darajada ku habboon kasta iyada oo la adeegsanayo foomamaka iyo habka qiimeynta shaqada ee lagu ansixiyey siyaasadda jaangoynta, darajooyinka iyo mushaaraadka shaqaalaha dawladda | | |
| | 23. In dib u eegis lagu sameeyo xeernidaamiyeyaasha shaqo qorista, haynta shaqaalaha iyo habraacayada khuseeya si wax ka beddal loogu sameeyo meelaha ay lagamamaarmaanka tahay. | | |
| | 24. In fulinta siyaasadda ee arrimaha darajeynta iyo qiimeynta shaqo qeexeyaasha lagu billaabo tiro yar oo ka mid ah hay'adaha dawladda oo leh | December 2026 | Wali billaaban |

| | | | |
|---|---|---|---|
| | (shaqaale joogto ah iyo ku meel gaar ah) si loo sii odoroso miisaaniyadda lacageed eek u bixi karta. | | |
| | 25. In la diyaariyo hannaan dib u eegis loogu sameynayo halbeegyada lagu dhisay darajooyinka iyo mushaaradda shaqaalaha ee siyaasadda haddii ay qoondada miisaaniyadda kharashka mushaaraadka cusub uu noqdo mid aysan dawladdu si joogta ah u bixin karin, ka dibna golaha wasiirradu dib u ansixiyaan | | |
| | 26. Sameynta xeernidaamiye maaliyadeed oo nidaaminaya isku xirka kharaska mushaaraadka iyo qoondada miisaaniyadda sanadlaha ah si waafaqsan SB-yada khuseeya barnaamijka IMF (haddii ay lagamamaarmaan noqotoin lagu dabbaqo). | | |
| | 27. Dhammeystirka jaangoynta cusub ee darajooyinka iyo muushaaraadka shaqaalaha iyo kala soocidda jagooyinka iyada oo la waafajinayo qoondo miisaaniyayeed dawladdu si joogta ah u bixin karto, waafaqsanna qodobbada siyaasadda. | | |
| | 28. In si joogta ah loola tashado dhammaan hay'adaha dawladda iyada oo lagu wargelinayo isbeddalada imaan kara inta lagu gudajiro jiro hirgelinta hirgelinta qodobbada siyaasadda. | | |
| | 29. In la sameeyo tartan furan oo ku dhisan mudnaanta shaqada, aqoonta, waayo-araknimada iyo kartida shakhsiga ee dhammaan shaqaalaha dawladda iyada oo oo ujeeddadu tahay ku habboonaanta in la hubiyo in shakhsi kasta dib loogu meeleeyo shaqada saxda ah ee uu qalmo. | | |
| **Wajiga 3aad: Marxaladda hirgelinta siyaasadda** | 30. In Ra'iisalwasaaruhu soo saaro wareekto lagu wargelinayo dhaqangelinta darajooyinka iyo mushaaraadka cusub ee looguuray dhammaan hay'daha dawladda iyo cid aksta oo ay khuseyso. | | |

| | | | |
|---|---|---|---|
| | 31. In la hubiyo marxaladda kala guurka dhammaan shaqaala rayidka iyo kuwwa ku meelgarka ah intaba in xogtooda lagu shubay xogkeydiyeyaasha dalwadda sida NCSC Database iyo SFMIS-ka Wasaaradda Maaliyadda si meeshaa looga saaro hubinti la'anta xuquuqda shaqaaalaha. | Jan – Nov 2026 | Wali billaaban |
| | 32. In la dajiyo hannaan kormeer, dabagal, islaxisaabtan iyo warbixin joogta ah oo lagula soconayo cabashooyinka shaqaalaha dawladda ee ka dhasha hirgelinta darajooyinka iyo mushaaraadka cusub si loo horumariyo meelaha gaabisku ka jiro. | December 2026 | Wali billaaban |
| | 33. In dawladdu mushaaraadka ku bixiso darajooyinka cusub Janaayo 2027, iyada oo ladhabgelinayo siyaasadda jaangoynta darajooyinka iyo mushaaraadka shaqaalaha Dawladda. | | |
| | 34. In si joogta ah dib u habeyn, wax ka beddal iyo casriyeyn loogu sameeyo xilka, waajibaadka iyo qaabdhismeedka dhammaan hay'adaha dawladda si loo jaangooyo baahida, tirada iyo qoondada shaqaalaha loo baahan yahay. | | |

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**